OGAYSIIS QUSEEYO SII DEYNTA XOGTA ARDAYDA EE WAALIDKA ARDAYDA DHIGATA DUGSIYADA SARE – QORISTA MILATARIGA

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul ahaan, xogtan soo socota ee ku saabsan ardaydu waa mid aan qarsooneyn:

- Magaca
- Taariikhda Dhalashada
- Fasalka
- Iskoolka
- Taariikhaha Isdiiwaangelinta
- Abaalmarinnada la Helay
- Xogta Hawlaha Manhajka ka Baxsan (oo ay ku jiraan dhererka iyo miisaanka ciyaartooyda)

Sharci-dejiyayaasha Minnesota iyo kuwa Aqalka Kongareeska Mareykanka labaduba waxay ansixiyeen sharciyo naga doonaya inaan sidoo kale kuwa ciidamada dadka u qoro u sii deyno ciwaannada, lambarada taleefannada, iyo iimaylka ardayda dugsiyada sare. Marka loo eego sharciyadaas, waxaad sidoo kale haysataa fursad ah in aad diiddid in la bixiyo xogtan quseysa adiga iyo ardaygaaga. Haddii aadan rabin in Saint Paul Public Schools ay xogtan adiga iyo ardaygaaga quseeyo u sii deyso dadka qoro ciidamada, fadlan buuxi foomka hoose oo ku soo celi iskoolka ardaygaaga. **Waalidka/mas'uulka ama ardayga gaaray da'da 18 wuxuu dooran karaa in uusan xogtan u siidayn dadka qoro ciidanka. Doorashadan way sii jiri doontaa haddii uusan waalidku/masuulku ama ardayga gaaray da'da 18 jir uusan iskoolka u soo gudbin codsi qoraal ah kaasoo u fasaxayo iskoolka in xogta loo sii daayo kuwa qora ciidamada.**

Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan Diiwaanka Ardayga iyo Xuquuqdaada, fadlan booqo spps.org/studentrecords.

Haddii aad rabtid inaad joojisid bixinta xogtaada la siiyo dadka ciidamada qoro, foomkan waa inaad buuxisaa oo aad ku soo celisaa iskoolka ardaygaaga ugu dambeyn September 30, 2026.

Magaca Ardayga: _____

Taariikhda Dhalashada: _____

Lambarka Ardeyga # (haddii la garanayo): _____

Iskoolka: _____

Fasalka: _____

Aniga oo ah waalidka/masuulka ardayga ama ardayga kor ku xusan ee da'diisu tahay ugu yaraan 18 jir, waxaan codsanayaa in magaciisa/magaceeda/magacooda/magacayga, ciwaankayga, lambarka telefoonkayga, iyo iimaylkayga **AAN MARNABA** loo sii dayn kuwa ciidamada ka qoro iskoollada Saint Paul Public Schools.

_____ _____

Saxeexa waalidka/masuulka ama ardayga jira 18 sano ama ka weyn | Taariikhda

Student Records, Student Placement Center
2102 University Avenue West
Saint Paul, MN 55114
651-632-3764